



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WAR-SAXAAFADEED 14/2010**

#### **Xafiiska Qarammada Midoobay u qaabilsan arrimaha siyaasadda Soomaaliya (UNPOS) oo abaabulay kulan lagu dabgalayo shirkii Istanbul ee Soomaaliya**

Nairobi, 10 June 2010- Iyadoo la tixraacayo shirkii Istanbul ee Somaaliya, ayaa Ergayga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay, Ahmedou-Ould Abdullah iyo wakiillo ka socda Bangiga Horumarinta Islamaka (IDB) iyo Dawlada Turkiya ayaa wada gudoomiyey kulankii ugu horeeyey ee lagaga hadlayo hirgelinta talooyinkii shirka lagu gaaray.

Kulanka, oo lagu qabtay codsi ka yimid Bangiga Horumarinta Islamaka (IDB), waxaa lagu sameeyey Guddi Shaqo oo si degdeg ah wax uga qabta dhinacyada adeegga asaasiga, dibudhisca iyo kaabayaasha, noolalmaalmeedka iyo tamarta. Kulanka waxaa kaloo looga dooday hanaan lagu abaabulo ilaha dhaqaalahi iyo habab maalgelin, kuwaasoo lagu sii kordhinayo hanaankii horey u sii jiray. Ka qeybgalayaasha waxay mar kale qeexeen baahida loo qabo in la maalgeliyo dib-udhiska iyo horumarinta, waxayna ku nuuxnuuxsadeen baahida loo qabo in lala shaqeeyo bulshada ganacsatada Soomaaliyeed oo qeyb muhiim ah ka qadanaya in nabad iyo amaan dib loogu soo celiyo Soomaaliya.

“Wada-shaqeynta aan ka wadno dib udhiska iyo horumarinta waa go’aan aan ku gaarnay inay naga go’antayah in talaabooyin isbarbarsocda laga qaado dhinacyada siyaasadda, amaanka iyo horumarinta”, ayuu yiri Md. Ould-Abdallah. Shirka waxaa ka qaybgalay wakiillo ka kala socda Faransiiska, Talyaaniga, Japan, Norway, Sweden, Soomaaliya, Turkiya, Ingiriiska, Midowga Afrika, Midowga Yurub, Urur Goboleedka IGAD, Jaamacadda Carabta, Bangiga Adduunka iyo Jamciyadda Bisha Cas ee Qatar.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

**[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)**